**JAMHUURIYADDA SOMALILAND** | **REPUBLIC OF SOMALILAND**

## XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
## SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند


| | | |
|---|---|---|
| *Sannadkii 11aad* | *Cadad Gaar ah* | *Tariikhda Daabacada 26/03/2022* |


# XEERKA SIYAASADA MIINADA
# XEER LR.41/2011


**Email: garyaqaankaguud@gmail.com**
**Web.www.garyaqaankaguud.com**


*Sannadka 2022*


*Lama iibin karo*
*Not for sale*

# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

REF. JSL/M/XERM/249-607/062011 DATE 30/06/11

# XEER MADAXWEYNE No: 0163/062011

## Dhaqan-galka Xeer Lr. 41/2011
## Xeerka Siyaasada Miinada

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, |
| Markuu Helay: | Go'aanka Golaha Wakiilada JSL ee ku suntan GW/G/16/04/2011 ee 23/06/2011, Go'aan Lr. GW/KF-14/516/2011, ee Ansixinta Xeerka Siyaasada Miinada, |
| Markuu Arkay: | Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland. |

Wuxuu Soo Saaray,

Dhaqan-galka Xeerka Siyaasada Miinada ee Jamhuuriyadda Somaliland ee Xeer Lr. 41/2011.

Allaa Mahad Leh,

REPUBLIC OF SOMALILAND President

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Ref: GW/G/KF-14/516/2011

Date : 18/04/2011

## Ujeedo: Go'aanka Ansixinta Xeerka Siyaasada Miinada

## (No: 41/2011)

**GOLAHA WAKIILADA JSL**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | Mashruuc Xeer lambar **41/2011** Xeerka Siyaasada Miinada |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka **38$^{aad}$, 61(2)$^{aad}$**,iyo **13$^{aad}$** ee Dastuurka JSL. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka **77$^{aad}$** iyo **78$^{aad}$** Hab raaca Xeer Dajinta. |
| **MARKUU ARKAY:** | Go,aanka ansixinta Guurtida **GY/JSL/G-41/032011** ee **01/03/2011**. |
| **MARKUU ARKAY :** | In Golaha Guurtida wax ka badal iyo kaabis ku samaynin Xeerka Siyaasada Miinada ee Xeer **Lr 41/2011** kuna Ansixiyeen Cod dhan Afartan **(40)** Mudane Sidii Golaha Wakiladu ugu gudbiyeen |

## WUXUU

Si uu uguto Waajibaadkiisa Dastuuriga ah waxa Golaha Wakiilada Siidisa Ugu Soo Gudbiyay Madax Waynaha JSL Xeer Siyaasada Miinada Xeer Lambar **41/2011**

**ALLAA MAHAD LEH**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada**

**C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)**
**Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL**

## Golaha Wakiiladu:

Markuu Arkay — Distoorka j/Somaliland qodobkiisa 26$^{aad,}$ 27$^{aad}$, 30$^{aad}$, 32$^{aad}$ iyo 33$^{aad}$ oo dhamaantood ku saan san badbaadada muwaadinimada Somaliland iyo sidoo kale daryeelka Degaanka.

Markuu Arkay — Xeerka mabnuucaya Miinada lidka dadka, xeer/NO: 40/2009.

Markuu Arkay — Xeerka Xakamaynta Hubka iyo Rasaasta Dagaalka, xeer/NO. 70/95, ee xadidaya hubka iyo rasaasta.

Markuu arkay: — Axdiga caalamiga ah mamnuucida miinada lidka dadka iyo burburintooda ee septempar (Ottowa convention)

Markuu arkay: — Qaraarkii baarlamaanka ee tirsigiisu ahaa gw/kf-7/98-99 ee lagu qaadanayo laguna taageerayo heshiisyada iyo baaqyada ay ka midka yihiin heshiiskii Ottowa ee 5/0ct/1996 iyo Baaqii Brussels ee 27/june/1997

Markuu tixgeliyay: — Qaraarka Golaha loo dhan yahay ee qaramada midoobay ee tirsigiisu yahay 52/173 ee 18/Dec/1997$^{kii}$ iyo qaraarka kale ee tirsigiisu yahay A/Res/53/26 ee Dec/1998$^{kii}$ eek u saabsanaa sida la isaga kaa shanayo hawlaha miino sifaynta iyo sidii la isaga kaalmayn lahaa hawlaha wax ka qabadka miinada ee caalamiga ah.

Markuu darsay — Taariikhda dheer ee ay leedahay miinada dhulka j/Somaliland, taas oo kasoo bilaabanta dagaalkii soomaalida itoobiya 1964$^{kii}$ iyo kii 1977-78, kuwii SNM$^{tai\ y}$ taliskii siyaad bare ee 1988$^{kii}$ilaa dagaalkii sokeeye ee 1992-95$^{kii}$

Markuu ku qancay — in ay jamhuuriyada Somaliland tahay dal ay aad u saameysay miinada dhulka iyo walxaha aan wali qarxin (UXO)

Markuu qadariyay — ahmiyada weyn ee ay leedahay in la helo siyaasad qaran oo dhameystiran oo lagula tacaalo laguna yareeyo khaterta iyo waxyeelada miinada dhulka iyo walxaha aan wali qarxin, isla markaana kala xadeysa hawlaha iyo waajibaadka ay qabanayaan hay'adaha ku hawlan waxqabadka miinada Somaliland.

## WUXUU ANSIXIYEY XEERKAN

## SIYAASADA WAX KA QABADKA MIINADA SOMALILAND

## CUTUBKA 1AAD
## Qodobka Guud

### Qodbka 1aad

### Eraybixinta

Siyaasaddan gudaheeda, ereyada hoos ku qoran oo laga soo qaatey qiyaasaha caalamiga ah ee hawsha miinada waxaa loola jeedaa: -

**Shil (accident):** waa fal aan la rabin lan filayn oo keena dhimasho ama dhaawac

**Aqoonsi (accreditation)** waa ha ka mid ah hababka ururada mina saarida rasmi ahaan loogu aqoonsado inuu awood u leeyahay in uu qorsheyn karo isla markiina uu maareyn karo hawsha miinada una wadi karo hawshaas si ammaan ah oo waxtar leh oo hufan.

**Hay'adda aqoonsig**

**(Accreditation body)** waa urur caadi ahaan qeyb ka ah wakaalada qaranka ee hawsha miinada kana mas'uul ah maareynta iyo hirgalinta hab qaran oo aqoonsi lagu siin karo hay'addaha miino-saarida.

**Udacwiga (advocacy)** marka la eego arrimaha hawsha miinada ereygaasi wuxuu dhigan yahay taageero cad oo la siiyo iyo dadweynaha oo lahu baraarujiyo ujeedooyinka hawsha miinada iyada oo ujeedada kama danbeynta ahi ay tahay in la baabiiyo ama ugu yaraan la dhimo halista ay leedahay iyo raad-reebka ka imanaya miinada iyo walxaha aan wali qarxin.

**Borotakoolka la kaabay**

**(Amended protocol 11)** waa xeer-nidaamiye mamnuucaya ama xadidaya adeegsiga hubka sida balaadhan loo isticmaalo qaarkood, kaas oo kaabis lagu sameeyay 3/may/1996kii lifaaqna u ah AXDIGA qaybtiisa mamnuucida iyo xadidaada adeegsiga noocyada cayiman oo hubka ciidamada ah oo keeni kara dhaawacyo halis ah yeelana kara waxyeelo baahsan oo cidwalba gaadha. Borotakolku waxa uu dhigayaa nidaamka loo calaamadaynayo iyo sida loola soconayo, sida loo duwaangalinayo macluumaadka ku saab beeraha miinada iyo goobaha miinaysan. Lifaaqa dhinaca farsamada ee heshiiskaasi waxa uu tilmaamayaa sida loo diwaangelinayo macluumaadkaas, waxaana ku qoran astaamaha caalamiga ah ee loo sameeyay beeraha miinada iyo goobaha miinaysan.

**Miino saarida (Demining)** waa sahanka iyo sifeynta ku xigta ee dhulka ay miinadu ku jirto iyada oo la qaadanayo talaabooyinka isku xiga ee ah helitaanka (detaction) soo saarida iyo burburinta dhamaan miinada iyo walxaha aan wali qarxin miinada saarida waxaa wadi kara ururo kala duwan, kuwaasi oo noqon kara, ururada aan dawliga ahayn (NGOs) shirkado ganacsi kooxo qaran oo hawsha miinad qaabilsan, ama unugyo military miinosaaridu waxay noqon kartaa tu ku salaysan xaalad degdeg ah ama tu la socota hore umarinta.

**Shil miino Saar**



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

(Demining accident) waa shil ka dhacay meel ay ka socoto shaqo miino saar ah oo ku saabsan ama walxaha aan wali qarxin.

Qorshaha ka-jawaabista

Shilmiinosaar (Deminding accident response plan)

Waa qorshe qoraal ah oo loo diyaariyay meel kasta oo ay ka socoto hawl miino saar ah, qorshahaas oo faahfaahinaya talaabooyinka la hirgaliyo si loo qaado dadka ku dhawacma shil miino saar, si degdeg ahna loo gaadh siiyaa daawayn ku haboon ama xarun qaliin loogu sameeyo.

Urur miinosaar

(Demaning Organisation) waxa loola jeedaa urur kasta ha noqdo mid dawli ah NGO ama military ama urur ganacsi oo ka ma sas'uul ah fulinta mashruuc miino-saarid ah. Ururka miinosaarku wuxuu noqon karaa qandaraasle sare (prime contractor) ama qandaraasle hoose (sub contractor) ama la taliye (consultant) ama hay'ad isticmaasha ururinta miinada.

Baabiinta (demolition) waa baabi'inta ama burburinta dhismayowga qalabka iyo aaladaha iyada oo la adeegsanayo dab iyo biyo qarxin ama dumin qaab mekaaniko ah oo wax la jiidhsiiyo ama lagu garaaco.

Dhulka wax lagu burburinayo

(Demolitation ground) waa dhul loo awood siiyey hay'adaha miinada inay ku burburiyaan rasaas ama waxyaabaha qarxa iyada oo loo adeegsanayo qarxiye (detonation).

Deeq bixiye (doner) waa ilaha maal-galineed oodhan, kuwaasi oo ay ku jiraan dawlaha deeqaha bixiya.

Walxaha qarxa

(explosive ordinance) waa dhamaan wixii ay ku jiraan baaruud iyo waxyaabaha kale ee keena qaraxa waxa ka mid ah hubka nukliyeerka hubka baa'oo lajiga iyo kan kimikada waxa kale oo ku jira bomka, sawaariikhda, xabadeha, madfaca iyo hoobiyaha iyo rasaasta hubka yeryer, dhamaan miinooyinka noocyadooda kala duwan miinada bada iyo waxyaabo farabadan oo kale oo qarxa, qaar gacanta lagu sameeyay iyo qaar kaleba.

(App/6)

Burburinta walxaha qarxa

(explosive ordinance Diposal, EOD) waa heli taanka tilmaanta noocayada ay tahay qiimeynta sidii amaan looga dhigi lahaa, soo qaadistooda iyo fogeynta iyo baabi'inta walxaha qarxa, taa oo noqon karta hawl galka sifeynta miinada marka la helo walxaha qarxa, waxaana laga yaabaa inay tahay xabedkaliya oo lag helay goob miinaysan agteeda, ama waxa ay noqon kartaa qaar badan

Sahan guud (general survey) waa ururinya qeexida, turjumaada iyo faafinta macluumaadka ku saabsan khatarta dhabta ah ee aya leeyihiin miinada iyo walxaha aan wali qarxin iyada oo ujeedada kama danbeysta ahi ay tahay macluumaadka kasoo baxa loo adeegsado qorsheynta mashaariicda miinosaarida.

La kala wareeg (handover) waa habka ay ka faa'idaysanaashu **(sida awooda qaran ee hawsha miinadu)** ula kala weegayaan kuna qaadanayaan xilka dhulka la sifeeyay. Mararka qaarkood waxa la isticmaalayaa erayada af ingiriisiga ee **(alienation)** marka la tilmaamayo dhulka miinada la sifeeyay ee lala kala wareegayo.

Miino-saarka aadaminimo

(Humanitrial demining) waa hawlaha ay ka midka yihiin saarida miinada iyo walxaha wali aan qarxin (UXO), hawlahaasi oo kamid yihiinsahanka dhinaca farsamda, maababka sameyntooda, sifeynta (clearance), calaamadaynta, diiwaangelinta dhulka la sifeeyay iyo wareejinta dhulkaasi.

Sahankaraad-reebka

(Impact service) waa qiyaas lagu sameynayo raad-reebka dhinaca bulshada iyo dhaqaalaha ee ay sababaan marka ay miinooyinku dhulka ku jiraan ama lamalaynayo inay dhulka kujiraan iyo walxaha aan wali qarxin ee dhulka ku filiqsan, si loo qiimeeyo qorshaynta iyo sida mudnaan kala siinta barnaamijyada iyo mashaariicda ku wajahan miinada.

Habka maareynta warbixinta

Hawsha miinadu (Information manager

System formine action, IMSMA) Waahabka ay ummada midoobey jecelyihiin inay u maareeyaan macluumaadka daruuriga ah ***(critical data)*** ee khuseeya barnaamijyada goobaha ee ay taageeraan isla markaana lagu isticmaalo xarunta (UM ee ne York). Waxaa adeeg sada shawqaalaha xarumaha hawsha ee heer gobol iyo fuliyayaasha mashaariicda hawsha miinad, sida ururada ku hawlan miino sifaynta.

Baadhitaanka (Inspection) marka la eego hawsha miinada, baadhitaanka waxa loola jeeda habkaloo qiyaaso, loo miisamo ama loo hubiyo dhulka la sifeeyay iyada oo isla markiina la barbar dhigayo qayb kamid ah dhulka la sifeeyay, dhul aan wali la sifeyn.

Hay'adaha baadhitaanka

(Inspection body) waa urursameeya baadhitaanka dhulka la sifeeyay isaga oo ka wakiil ah hay'adaha qaranka ee hawsha miinada iyada oo la sameynayo xulashada nasiibka ah (***random sampling***) ama wixii kale ee nidaam ah ee lagu heshiiyo in kormeer iyo baadhitaan lagu sameeyo.

Qiyaasaha caalamiga ee

Hawsha miinada (International

Mine action standers IMAS) waa qoraalo ama dokumenti ay abuureen ummadaha midoobay iyaga oo ka wakiil ah bulshada caalamka, kuwaasi oo ujeedadoodu ay tahay in la hagaajiyo amaanka iyo wax qabadka hawsha miinada.

Ururada caalamiga ah ee

Qiyaas-sameynta (international



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

**Organisation for standardization ISO)** waa is-bahaysi caalami ah oo ka kooban ururo heer qaran ah oo ka kala tirsan ilaa **130 dal.** Hawlgalkoodu waxa uu keenaa heshiisyo caalami a ah oo la dabaaco iyaga loo bixiyo ama lagu magacaabo qiyaasaha iyo tilmaamaha ISO **(ISO standards and guids)** Ururkani waa mid aan dawli ahayn (NGO), qaiyaasaha iyo timaamaha ay dejiyaan waa qaar mutadawacnimo ay u sameeyeen (gaar ahaan kuwa ku saabsan dhinaca caafimaadka, amaanka iyo deegaanka). Kuwaasi oo dalal badan ay uqaateen xeerarkii ay ku shaqeeyaan. Ururkan (ISO) waxa uu la tacaalaa dhamaan dhinacyada faraha badan ee hawlaha bani'aadamka, oo ay kujireen wajiyada badan ee hawlaha miinada, kuwaasi oo leh qiyaaso laysku raacey.

Wax ka qabedka miinada

(Mine action) waa hawlgalo ujeedadoodu ay tahay in la yareeyo raadreebka dhaqaale, ka bulsho iyo kan deegaan ee ay leeyihiin miinada dhulka iyo walxaha aan wali qarxin (UXO).

Wacyigalinta Miinada

(Mine awareness) waa istiraatijiyad dhinaca is-gaadhsiinta iyo dhan-baalgudbinta ah oo qayb ka ah hawsha miinada oo ujeedadeenduna ay tahay ka hor taga inay dhacaan ama la yareeyo tirade dhaawacyada ka yimaada dhulka miinooyinku iyo walxaha aan wali qarxin.

Heshiis mamnuucidda miinada

(Otowa convention) waa axdi ku baaqaya in ay si buuxda loo xaarantinimeeyo adeegsiga kaydinta, samaynta, iyo lakala wareegga miinooyinka lidka dadka (APMs) iyo burburintooda marka loo eego ujeedooyinka nidaamka qiyaasaha caalamiga ah ee hawsha miinada (IMAS), qodobka 5[aad] ee heshiiska otowa waxa uu qorayaa waxyaalaha loo baahan yahay in la sameeyo si loo burburiyo miinada lidka dadka eek u jiredhulka miinaysan.

Maamulka qaranka ee

Hawsha miinada (National mine

Action authority) waa waaxaha dawlada, ururada iyo hay'adaha ka jira dalkasta oo dhulkiisa ay miinadu saamaysay, kuwaas oo loo xil saaray haynta maamaraynta iyo isu-duwida hawsha miinada.

Sahanka qaranka

(National survey) waa tiro-koob buuxa oo la soo taabanayo dhamaan goobaha la sheegay ama lagu tuhun san yahay inay miino ku jirto ama ay ku filqsan yihiin walxaha aan wali qarxin,tirade iyo nooca aaladaha qarxa iyo macluumaadka ku saabsan nooca ciidda ee dhulka, nooca dhirta iyo kaymaha cimiladda miisaamida baaxada ay leedahay raad-reebka mushkilada miinada ee bulshada miinada ee bulshada shakhsiga iyo dadka guud ahaan (sahanka raad-reebka).

Siyaasad (policy) waa habmuujinaya sidii loo dajin lahaa la isuna waa fajinlahaa ujeedooyinka (objectives), bartilmaameedyada (goals),qorshayaasha (plans), iyo hawlgalada (operations) wax kaqabadka miinada.



XAFIISKA GARYAQAANKA ... FAAFINTA RASMIGA AH

**Maaraynta tayada leh**

**(Qualitymanagement)** waa dhamaan dhaqdhaqaaqyada la xidhiidha maareynta guud ee hawsha siyaasada (policy) iyo qaabka loo fulinayo ujeedooyinka iyo xilalka la xidhiidha siyaasadaasi, iyada oo la raacayo qorshayn tayo leh (quality planning), gacan-kuhayn tayo leh (quality control) iyo hubinta tayada (quality assurance) si loo hor mariyo tayada miinada guud.

**Gacan-kuhaynta tayada**

**(quality assurance)** waa dhamaan hawsha la sameeyo oo kaliya inta hawshu socoto, dabadeed la eego sida ay u socoto sifeynta miinadu.

**Nidaamyadda hawlgalada**

**Joogtada ah (standing operating procedures)**

Waa tilmaamo iyo xeerar tusaaleeya habka lagu dhaqmo ama loo fuliyo hawlgalada ama shaqada. Ujeedada laga leeyahay nidaamkan waxa weeye in ururka gudihiisa loo wado shaqada qaab laysla ogyahay oo la garankaro lana qiyaasi karo taas oo keenaysa in habka waxqabadku uu noqdo mid wada socda oo siman, lehna anshax iyo kala danbeyn ururka gudihiisa.

**Sahanka heerka 2aad**

**(Level 2 servey)** waa baadhitaan faahfaahsan ee khariiradeed (topographical) iyo farsamo (technical) oo muujinaya goobaha lagu ogyahay ama looga shakisan yahay inay miino kujirto, kaas oo lagu ogaadey xiligii qorshaynta la sameenayay, goobaha noocaas ah, waxa kale oo suuro gal ah in lagu ogaadey markii la sameeyay sahanka guud amaba lasoo sheegay.

**Dhacdo miino**

**(Mine accident)** waa shil ka yimi miino ama walxaha aan wali qarxin oo ka dhacay Goob aan shaqada miino saarku aanay ka socon.

**Walxaha aan wali qarxin**

**(Unexploded ordinance uxo)** waa walax/walxo qarxa oo loo diyaariyay in la isticmaalo amaba la isticmaalay, taas oo lagui dhigay tuuris, ganid ama qarxin, aanse wali ha ahaato shaqayn la'aan ama hab kale oo loogu talo galay.

**Gudida**

**(Mine action commition)** waa gudi wasaaradeedka qaranka ugu igman wa ka qabadka miinada.

**Xafiiska hawlaha miinada** waa xafiiska M/weyne ku-xigeenka ee qaranka ugu qaabilsan hawlaha miinada.

## Qodobka 2[aad]

## Siyaasada Wax ka qabadka miinada

- Siyaada hawsha miinada (mine action policy) ee dawlada Somaliland waxa weeye in la ilaaliyo danta iyo danta shisheeyaha dalaka ku sugan. Sida awgeed, ujeedada hawsha miinadu waxa weeye:



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH

a) In la dajiyo siyaasad tifatiran oo ku saabsan miinada dhulka iyo walxaha aan wali qarxin (uxo) taasi oo waafaqsan sharciga Somaliland isla markaana la jaanqaadaya qiyaasaha caalamiga ah ee hawsha miinada (IMAS) iyo heshiiska ottowa. Siyaasadan iyada ah waa in lagula dhaqmaa siyaasada dhamaan dadka ku hawlan burburinta walxaha aan wali qarxin (UXO), iyo dhamaan ku jira tababarada ku saabsan khatarta miinada iyo kaalmaynta naafada ay dhaawacdey miinada.

b) Inla sameeyo siyaasad ujeedadeedu ay tahay sidii xal loogu heli lahaa mushkilada miinada dhulka iyo walxaha aan wali qarxin ee somaland.

c) In la sameeyo siyaasad ujeedadeedu ay tahay sidii xal loogu heli lahaa mushkilada miinada dhulka iyo walxaha aan wali qarxin ee Somaliland.

d) In la hubiyo in siyaasadaasi ay qarinayso dhamaan heshiisyadii ay hore uwada galeen dawlada Somaliland iyo hay'adaha caalamiga ah ee kala duwan.

e) Siyaasada jamhuuriyada Somaliland ay kula dhaqmayso mushkilada miinada dhulka waxay ixtiraamaysaa mabaadiida miinada. Somaliland waxy aqoon sanaysaa in dawlad kasta oo ay saamaysay miinadu ay masuul ka tahay sifaynta miinooyinka iyo walxaha aan wali qarxin ee dhulkeeda ku jira ama ku filiqsan, waxaana ay la shaqeynaysaa hay'adaha ugaarka ah si loo fuliyo dib u dhiska mudada dheer ee hay'adaha ugaarka ah si loo fuliyo dib u-dhiska mudada dheer ee hay'adaha maxaliga ah ee la tacaali doona hawlgalka miinada lana shaqayn doona dhinacyada dawlada iyo dadweynaha gaarka ah (public and private sector).

f) Siyaasada wax ka qabadka miinadu, (mine action policy) waxay culayska saaraysaa sidii loo horumarin lahaa awooda qaran ee ku saabsan qorshaynta maareynta iyo fulinta straatejiyadaha heer qaran ee hawsha miinada. Rajada ugu fiican ee aan qabno eek u saabsan sidii loo gaadhi lahaa ujeedada sifaynta miinada waxa weeye, in kor loo qaado awooda dadka reer Somaliland ee ku saaban wax ka qabadka miinada.

g) Dawlada Somaliland, marka ay hubiso in al abaabulay agab iyo maaliyad ku filan, waxay u halgamaysaa sidii loo gaadhi lahaa xaalad horumar caadi ah iyo miinada oo aan cidna dhaawacin, xaaladaasi oo lagu gaadhi karo muddo toddoba iyo toban sanaddood ah. marka lagaadho sannadka 2010, waa in ugu yaraan boqolkiiba %80khatarta miinada la sifeeyaa. Haddii laheli taageero caalami ah oo lagu xalinayo mushkilada.

## Qodobka 3[aad]

## Ujeedooyinka siyaasaddan (objectives)

❖ Saamaynta doorka ah ee dhaqan-dhaqaale ee taban (negative socio-economic impact) ee ay miinadu ku leedahay miinadu bulshada Somaliland meelkastaba way ka muuqataa, waxaana muujiyay sahankii raad reebka miinada ee afarta Gobol.sidaa awgeed, waxaa iska cad baahida loo qabo barnaamijka ku haboon oo hawshaamiinada ah oo lagu baajinayo dhibaatada iyo khatarta aadami ee ay gaystaan miinada dhulka iyo walxaha aan wali qarxin, taas oo ujeedada ka danbaysaa ay tahay sidii dawladda Somaliland ay u qaadi lahayd tubta dib-udhiska iyo horumarka. Si tan loo hirgaliyana, dawladda Somaliland waxa ay u dhaqaaqday dejinta iyo cadaynta siyaasadeeda qaran ee hawsha miinada ee aadaminimo. Siyaasaddana guud ahaan waxaa loogu jeedaa:

a) Hirgalinta siyaasada qaranka oo leh qorshe istiraatiji ah oo keenaya dib-unoolaynta dhaqdhaqaaqa iyo joogtayntiisa.

b) Abuurista deegaan amaan ah oo ay ku noolaadaan dadweynuhu gaar ahaana soo noqdayaasha qaxootiga iyo dadka dalka gudihiisa ku barakacay.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE

c) In la siiyo awood dhisid, hay'addaha qaranka ee hawshaasi gaar ahaana xarunta wax ka qabadka ee miinada Somaliland (SMAC) iyo hay'addaha miino saarka qaranka.

d) In mudnaanta hawsha miino saarida la siiyo meelaha ay aad u saamaysay miinadu ama meelaha ubaahan wax ka qabad degdeg ah.

e) Isu-duwida iyo xidhiidhinta hawl galada miinada ee ka socda dhulka jamuuriyada somalilad waxa u xilsaran xafiiska hawsha miinada qaranka iyo ha'addaha hoosyimaada sida, xarunta wax ka qabadka miinada (SMAC)

f) Lamaanayaasha fulinta (implementing partner) waxaa ay ka caawiyaan hay'adda SMAC sidii ay u abuuri lahayd keydka macluumaadka ee qaranka oo ku saabsan dhamaan hawlaha miino-saarida ee dalka (qiyaasaha caalamiga ah ee hawl galada sifayta miinada ee aadaminimo)

g) In macluumaad loo ururiyo qorshaynta iyo fulinta hawl miino oo midho-dhal ah

h) In la raadsho ama la siiyo awood dhis hay'adda miino-saarida qaranka (NDA).

i) Kor u qaadista barashada ku saabsan khatarta miinada iyo kaalmaynta dadka ay waxyeelaysay miinadu.

j) Ka qayb-qaadashada aqoon iswaydaarisyada iyo shirarka heer gobol caalami ee ku saabsan wax ka qabadka miinada, ku waasi oo ay ku jiraan ololaha ku baraarujinta ka waantawga adeegsiga iyo samaynta miinada dhulka.

k) In la qaban qaabiyo tabobaro iyo barmaanijyo hore u marinta xirfadeed oo ku saabsan sidii loo fulin lahaa wax qabadka miino saarida loona gaadh siin lahaa darajo sare oo la ogolaan karo.

## Qodobka 4[aad]

## Balanqaadka dawlada Somaliland

❖ Dawlada Somaliland waxay ogolaanaysaa masuuliyadaha ka saran dhibaatada ay leeyihiin miinada iyo walxa aan wali qarxin, waxaa ay u halgamaysaa sidii ay uga hortagi lahayd dhibaatooyinkaas una badbaadin lahayd shacabkeeda. Dawladu hubinaysaa in la fuliyo qodobada hoos ku xusan:

a) Cidii lagu helo in ay haysato miino ama walxaha qarxa waxaa la marinayaa sharciga dalka u dajisan, sida ku cad xeerka mamnuucidda lidka dadka.

b) Halista miinada dhulka aad ayaa loo dhimi, loona yarayn si loo hubiyo badbaadada dadwaynaha rayidka ah.

c) Dawladu waxay u dadaalaysaa in ay tirtirto halista ay miinadu ku hayso dadka reer miyiga, reer magaalka iyo xoolaha nool intaba.

d) Dawladu wax dajin qorshaha guud eek u saabsan burburinta miinada dhulka.

e) Dawlada waxay xilkeeda qaadi ilaalinta danaha ay leeyihiin dhinacyada ku jira hawsha miinada ee aadaminimo ama ha noqdeen kuwo qaran ama ha noqdeen kuwo caalami ah, ilaalintaa oo waafaqsan shuruucda Somaliland.

f) Dawladu waxay hubin in hawsha miinada lagu daro dhamaan qorshayaasha qaranka, isla markaana waxay u taageeri hawsha miinada si kasta oo ay karto.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA ◆ FAAFINTA RASMIGA AH ◆ OFFICIAL GAZETTE ◆ SOLICITOR GENERAL OFFICE

# CUTUBKA 2AAD

## Istiraatijiyada siyaasadda

### Qodobka 5^aad

### Himilada siyaasadda (vision)

- Himilada barmaanijka hawsha miinada ee Somaliland waa in dalka laga xoreeyo raad-reebka miinada iyo walxaha aan wali qarxin, muddo ilaa 10 sannadood, taasi oo ku xidhan heerka maalgelinta joogtada ah.

### Qodobka 6^aad

### Bartimaameedyada siyaasadda (gaols)

- Dawlada Somaliland waxay diirada saaraysaa ujeedooyinka fikirada aasaasiga ah ee hoos ku xusan marka la fulinayo barnaamijka hawsha miinada:

a) **Adkaynta qaab-dhismeed ka maareynta iyo dhismaha hay'adda ku haboon:**

Qaabdhismeedka maarayta iyo hay'addaha ku haboon fulinta barnaamijka hawsha miinada waa in la dakeeyo si loo hubiyo si loo hubiyo barnaamijku uu u fulo sidii loogu talo galay ee habaysnayd ama hufnayd, taasi oo la jaan qaadaysa qorshaha qaranka ee hore-u marineed, qorshahaasi oo ay ku jiraan hawlaha ay lamaanayaasha fulineed.Tani waxay keeni in ay abuuraan hay'addo qaran oo awood u leh qorshaynta, mudnaansiinta, maaraynta,iyo isu duwida barnaamijka qaranka ee hawsha miinada.

b) **Sahanka beeraha miinada. calaamadaynta iyo keydka macluumaadka:**

Hawlahani waxay laga ma maarmaan u yihiin qorshaha baaxada ay leedahay mushkida miinada dhulku. Qorshaynta iyo sifaynta meelaha mudnaanta leh ee miinaysan isla markiina lataageero hori-umarka iyo shaqooyika aadaminimo. Waxaa kale oo inaga caawinayaan hawlaha kor ku xusani, in la hubiyo meelaha ay ku yaalaan goobaha miinaysan lana calaamadeeyo goobaha miinada laga sifeeyay waa in loo sameeyo shahaadad cadayn, isla markiina lagu muujiyo maababka lana galiyo kaydka macluumaadka konbuyuutarka. Waxaa kale oo lagama maarmaan ah in la ogaysiiyo dawladaha hoose iyo dadka deegaanka ku nool, iyada oo sheegayo gaabaha la sifeeyay iyo meelaha wali halista ah.

c) **Sifaynta miinada**: baadhida, helida iyo burburinta miinada iyo walxaha aan wali qarxin in loo wadaa qaab waafaqsan mudnaanta qaran iy qiyaasaha caalamiga ah ee hawigalada sifayta miinada ee aadaminimom (international satanderds for humanterial mine clearance operations). Qaybtan waxaa ka mid ah in miino saarayaasha la siiyo qalabka laga ma maarmaanka u ah hawlo miino sifayn ah oo heer sare ah isla markaana aamin ah. sidaa ayaa waxaa ku buurmaya awood qaran oo miino saarid ah oo la joogtaytaynkaro.

d) Ku baraarujinta miinada: in la xoojiyo barnaamijka aqooneed ee wacyigalinta iyo ku baraarujinta halista miinada ee hada jirta, iyada oo la adeegsanayo awoodaha iyo agabyada hadda la hayo. Kooxaha bartilmaameedka u ah ku baraarujinta iyo balaadhinta wacyigalinta waa in la gaadh siiyaa dadwaynaha ku nool dhamaan meelaha ay miinadu saamaysay.

e) **Kaalmaynta naafada**: waa in la xoojiyaa awooda maxaliga aa ah ee kaalmaynta dadka ay naafaysay miinadu. Waa in lahu dhaqaaqo tabarka xirfadlayaasha wadaniga an ah, isu-duwidda khayraadka (resources) hadda jira, iyo helidda agab khayraad dheeri ah.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

## CUTUBKA 3AAD

## Dhaqaalaha iyo maalgalinata hawsha miinada

### Qodobka 7[aad]

### Miisaaniyada

a) Xukuumadu iyada oo eegaysasa awoodeeda dhaqaale waxa ay ugu qoondaynasaa miisaaniyada qaranka qadar gundhig ah hawlaha wax ka qabadka miinada. Qadarku wax uu noqonkaraa lacag ama hanti: sida Guryaha.

b) Xarunta wax ka qabadka miinada (SMAC) waxa ay xukumadada kala talinaysaa kharash ka iyo iskugaynta qorshaha mudada dheer ee xalinta mushkilada miinada ee Somaliland.

c) Lamaanayaasha caalamiga ah iyo wadanigu wada tashi ayay la samaynayaan xukuumadda iyo xarunta xidhiidhinta (coordination), inta ayna codsi deeqbixiyayaasha usamayn.

d) Lamaanayaasha caalamiga ah iyo kuwa wadaniga ah waxay mudnaanta siinayaan codsiyada sita taageerida maamulka wax ka qabadka miinada somliland (Somaliland mine action authority) ee sicadna u tilmaamaya iledhaqaale ee maalgalinta.

e) Cadsiga ka dib, miisaaniyadda waxa loo gudbinayaa guddida (the commission) iyo xarunta wax ka qabadka miinada si ay go'aan uga gaadhaan boqolkiiba (percentage) in lagu kharash gareeyo dalka gudihiisa. Qaydinta miisaaniyadu waa hogaan ama tilmaan, hase yeeshee, lammaanayaasha hawsha lafulinayo gudida wax ka qabadka miinada, waxa ay xaq uleeyihiin in ay badalaan qaybinta miisaaniyada, gaar-ahaan hadii alaabooyinka iyo qalabka loogu baaahanyahay fulinta barnaamijka aan laga iibsan Karin jamuuriyada Somaliland.

f) Lamaanayaasha fulintu (LPS) waxa ay ugu bgudbinyaan gudida wax ka qabadka miinada iyo xarunta wax ka qabadka miinada ee Somaliland (SMAC), nuqulada dhamaan barnaamijyda iyo soo jeedimaha (proposals) ay u gudbiyaan deeqbixiyayaasha.

g) Soo jeedimahaasi waxa ka mid noqonaya qorshe-hawleed guud ama faah-fasan, taasi oo ay hay'adahaasi ku cadaynayaan sid aya u taageerayaan hawlaha mudnaanta qaranka leh ee sifaynta, waxbarasha khatarta miinada iyo kaalmayta nadaafada.

h) Lamaanayaasha fulinta waxa ay u gudbinayaan dhamaan rikoodhada iyo macluumaadka (data) ay hayaan xafiiska habka maaraynta macluumaadka hawsha miinada (IMSMA) iyo wax ka qabadka miinada ee Somaliland (SMAC)

i) Lamaanayaasha fulinta waxa ay buuxinayaan dhamaan rkoodhka iyo warbixinaha (reports) iyaga oo u dhamays tiraya qaab waafaqsan nidaamka caalamiga ah, dabadeed na waxa ay u gudbinayaan xarunta wax ka qabadka miinada ee Somaliland.

j) Warbixinahaasi wxay u qornaanayaan qaabka ay dajisay hay'ada adeega hawsha miinda ee umadaha midoobay (united nationsmine action service)

k) Dhamaan rikoodha iyo warbixinaha caynkaas ahi waxay noqonayaan qaar dadwaynuhu heli karaan ama codsadaan.

l) Lamaanayaasha fulintu waxay daabici doonaan reboodh bille ah oo ku saabsan dhamaad ka hawlaja ayb wadaan kaasaa oo ay u gudbin doonaan xarunta wax ka qabadka miinda ee Somaliland.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA • FAAFINTA RASMIGA AH • OFFICIAL GAZETTE • SOLICITOR GENERAL OFFICE

m) Lamaanayaasha fulintu waxay gudbindoonaan XAFIISKA hawsha miinda qaranka nuqulada (copies) warbixin tooda kaasi oo ka xidhiidha marka la diro.

## CUTUBKA 4AAD

### Hawl-galada miinada (operations)

### Qodobka 8aad

### Wax ka qabadka miinada (mineaction)

a) Hawlgalada wax ka qabad ka miinada ujeejadeedu waxay tahay in la yareeyo raad reebka dhaqaale, ka bulsho ay kan deegaan ee ay leeyihiin miinada dhulka iyo walxaha aan wali qarxin (UXO) sidoo kale, hawsha wax ka qabadka miinadu waxa ka mid aha in la yareeyo halista ka imanaysa miinada dhulka lana gaadhsiiyo heer ay dadku si amaan ah u noolaan karaan, isla markaana u gaadhaan harumar dhaqaale, kan bulsho iyo kan caafimaad una socdaan hawshaasi si ka xor ah diiqada ay galinayso miinada dhulku. Guud ahaan, hawlgalada wax ka qabadka miinadu waxa aya ka kooban yihiin shan qabood (five parts) oo hawlo ah oo is dhamaystiraya ku waasi oo ah:

- ✓ Aqoon ku saabsan wacyigalinta iyo yaranyta khatarta ka imanaysa miinada iyo walxaha aan wali qarxin.
- ✓ Miinosaarida aadaminimo taasi oo ah sahanka miinada iyo walxaha aan wali qarxin, maab-samaynta, calaamadaynta iyo (hadii ay daruuri noqoto) sifaynteeda.
- ✓ Kaalmaynata dhibanayaasha oo ay ku jirto dhib-u habayntooda iyo dib-usoo celintooda bulshada (victim rehabilitation, reintegration)
- ✓ Burburinta kayd ka miinada iyo walxaha aan wali qarxin, iyo
- ✓ U dacwiga in aan la adeegsan miinada lidka dadka.

### Qodobka 9aad

### Maaraynta wax ka qabadka miinada

a) Xafiiska m/weyne ku-xigeenka ee hawlaha miinada qaranka ugu qaabilsan iyo hay'adaha miinada ee hoosyimaada, sida gudida qaranka ee miinada, SMAC IWM. Ayaa ka masuul ah samaynta siyaasad qaran oo lagu maamulo iyo abuurista nidaamka lagu maaraynayo hawlgalada miino saarka iyo dajinta sharci qaran oo mamnuucaya adeegsiga miinada iyo walxaha aan wali qarxin, iyaga oo adeegsanaya xarunta wax ka qabadka miinada ee Somalilad (SMAC).

b) Mudnaanta qaran ee hawsha miinadau waxay salaysnaan doonataa natiijada ka soo baxday sahanka raad-reebka miinada dhulka (landmine impact survey) mudnaan taasina waxaa dajinaysa xarunta wax qabadka miinada ee Somaliland (SMAC), taasi oo ay ansixinayaan gudidda wax ka qabadka miinada.

c) Nidaamka hawgalka joogtada ah (SOP) ee ay dajisay SMAC ayaa noqonaya heerka ugu sokeeya ama ugu yaraan ay ku dhaqmayso hay'adda kasta oo kamid ah hay'addaha ku mashquulsan hawlgalka miino-saarida Somaliland. Heerka ay gaadh siisan tahay safaynta miinadu waxaa qeexaya xeer caalamiga ah ee hawsha miinada (IMAS) iyada oo sahan farsamo uu muujiyo arrin taa ka duwam maahee.

d) Gudidda wax ka qabata miinada (inter minitterial commission) oo adeeg sanaysa xarunta SMAC o ka wakiila ah dawladda ayaa bixinta warbixinta la siinayo deeq-bixiyayaasha ama ururada kale ee



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR ... OFFICE

caalamiga ah uguna warami horo-umarka ay samaynayso wax ka qabadka miinada ee Somaliland, una sheegi dhinbaatooyinka ka hor imanaya hawshaasi.

## Qodobka $10^{aad}$

## Abaabulka agabka ama khayraadka

a) Dawlada ayaa bixinaysa ama weydiisan bulsho waynta caalamka deeq maaliyadeed oo lagu fuliyo sifaynta miinada iyo hawlha ka ee miinada.

b) Dawlada ayaa bixin xafiisyada ay ku hawlgalayaan xarunta wax ka qabadka miinada ee Somaliland (SMAC) iyo guddida wax ka qabadka miinadda iyo hay'adda miino-saarka qaranka (NDA). Dawladu wax kale oo bixinaysaa kharashyada adeega ee hay'addahaasi (sida, laydhka, biyaha, amniga, iwm.)

c) Gudidda wax ka qabadka miinadu, iyagaa ka wakiil ah xafiiska hawlaha miinada, waxay abaabulayaan shaqaalaha dawlada gaar ahaana ciidamada qalabka sida in ay ka qayb qaataan sifaynta minada marka awood dhaqaale loo helo.

d) Dhamaan shaqaalaha dawlada ka qaybgelaya hawlaha miinada waxaa la siin tababar ku filan oo ah kii ugu dambeeyay sancada ama xirfadaha miin-saaridda cilmiga.

## Qodobka $11^{aad}$

## Sahanka guud/sahanka raad-reebka miinada (LIS)

❖ Xarunta wax ka qabadka miinada ee Somaliland (SMAC) ayaa leh xilka isu duwidda sahanka raad-reebka miinada ee guud ama sahanka heerka kala duwan ee saamaynta miinada ee dhamaan dhulka Somaliland.

## Qodobka $12^{aad}$

## Mudnaanta hawsha miinada

a) Iyada oo ku salaysan natiijadii sahanka raad-reebka miinada (LIS) ayaa xarunta wax ka qabadka miinada ee Somaliland, waxaa na ay soo hordhigaysa gudidda (the commission) sida ay hawluhu u kala mudan yihiin si ay ogolaanshiyaheeda u raaciso una ansixiso

b) Arimaha mudnaanta leh ee hawsha miino sifaynta waxaa ka mida;

- ✓ Gudbinta kaalmada dag-dega ah.
- ✓ Dhulka ladagan yahay ee ay aad ka ugu badadn tahay dhaawaca miinada eedadka rayidka ah.
- ✓ Dhulka looga baahan yahay dibu-dejinta qaxootiga iyoi dadka ku barokacay dalka guduhiisa (IDPs)
- ✓ Dhulka looga baahanyahay in laga dhigo dhulbeereer.
- ✓ Dhulka looga baahan yahay baru-marinta bulshada
- ✓ In marin loohelo (access lana suuro galiyo hawlgalka xorta ah ee adeegga telefoonada iwm.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 13aad

### Isu-duwidda

❖ Isu-duwida hawsha miinada ee Somaliland, waxaa isku-duwaya oo habaynaya xarunta wax ka qabadka miinada ee Somaliland (SMAC).

## Qodobka 14aad

### Barashadda khatarta miinadda

a) Dawladda iyo wasaaradaha ku mashquulsan barashada khatrata miinada, kuwaasi oo ay ka mid yihiin wasaarada tacliinta iyo warfaafinta waxa ay kaalmo ka geysanayaan hirgalinta aqoonta ku saabsan halista miinada.

b) Guddida wax ka qabadka miinada (mine action commission) iyda oo ka wakiil ah dawladda adeegsaneysana SMAC ayaa waxay qaadi mas'uuliyadda sidii loo heli lahaa kaalmo caalmi ah oo lagu hirgeliyo barashada ku saabsan khatarta miinada (mine risk education).

## Qodobka 15aad

### Kaalmadda dhibanayaasha

a) Dawlada iyo wasaaradeheeda takhasuska u leh sidaa wasaarada caafimaadka ayaa siinaya wax alla wixii suuragal ah ee ay kaalmo u heli karaan dadka dhibanayaasha ee ay miinadu wax yeeshay ama dhawachay.

b) Guddida wax ka qabadka miinada (commission) ayaa ka ma'suul ah sidii loogu raadin lahaa kaalmo caalami ah dhibanayaasha ay dhaawacday miinadu iyada oo adeegsanaya xarunta SMAC.

## Qodobka 16aad

### Shaqadda iyo shaqaalaha

a) Xeerka dhinaca shaqda iyo shaqaalaha ee jamhuuriyada Somaliland ayaa hagaya qaabka loo shaqaalaynayo shaqaalaha wadaniga, waxaana la raacayaa arrimaha hoos ku xusan.

b) Marka dad la shaqaalaynayo hawsha miinada, mudnaanta waxaa la siinayaa muwaadiniinta raar Somaliland iyada oo tiro kooban oo khubaro ajanbi ahi ay la shaqaynayaan, kuwaas oo wata takhasus ama khibrado u gaar ah. Shaqaalaha reer Somaliland waxaa mudnaanta loo siinayaa, iyada oo la doonayo in kor loo qaado oo la joogteeyo awooda muwaadiniinya reer somliland ee dhinaca hawsha miinada.

c) Lamaanayaasha fulinta waxa ay siinayaan xarunta wax ka qabadka miinada ee Somaliland nuqulo ku saabsan nidaamka hawlgalka joogtada ah (SOP) ee ay caadi ahaan uhu shaqeeyaan, kaasi oo waafaqsan qiyaasaha caalamiga ah ee hawsha miinada (IMAS)

d) Hadii qofshaqaalaha ka tirsan la eryo, markaasi lammaanayaasha fulinta waxaa ay raacayaan xeerka shaqada ee Somaliland waana inay cadeeyaan in erigu uu ku yimid sababo cad.

e) Dhamaan shaqaalaha u shaqeeya hay'dda miino-saarku waxa ay ku shaqaynayaan heshiisyo (contract) cayiman oo ay la galaan lamaanaha fulinta (IPs). Heshiis yadu waxa ay qeexayaan sida loo rabo qofka shaqaalaha ahi inuu dhaqmo iyo sida uu u shaqynayo, sidoo kalena waxa ay qeexi doonaan sabaha keeni kara in shaqada laga eryo qofka shaqaalaha ah kuwaasi oo ay ka mid yihiin inuu ku dhaqmi waayo xeerarka iyo nidamka u degan miino saaridda iyo inuu ku dhaqmi waayo tababarada iyo nidaamka amaanka sida ay u dhigeen hay'adaha miino-saarka.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE JAMHUURIYADDA · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE

f) Hadii qofshaqaalaha ah isla markiiba la eryo (instant dismasal) ma yeelanayo mushar danbe oo ka danbeeya ka markaas la siinayo. Lamaanayaasha fulintuna waxa ay u gudbinayaan XAFIISKa hawlaha miinada waxbixin buuxda oo ku saabsan sida ay wax u dhaceen xafiisku waxa u taageero karaa labadaas qofka shaqaalaha ah waxaa xuquuqdiisa ilaalinaya wasaarada shaqada iyo shaqaalaha.

g) Lamaanayaasha fulintu waa ay ku dhaqmayaan ciidaha wadaniga ah iyo kuwa diiniga ah sida ku qoran xeerka shaqada ee Somaliland. Shaqaalaha la siin mayo gaadiid ay ku safraan oo ay guryohoodii ku aadaan ciidada wadaniga ah iyo kuwa diiniga ah.

h) Lamaanayaasha fulintu waxay sii nayaan shaqaalahooda cuno ku filan maalin kasta ama sadex wakhti cuntadood maalintiibam hadba sida lagu heshiiyo. Markasta oo ay shaqaaluhu ka maqan yihin xaruntooda oo ay ku maqan yihiin hawsha miino saarka ee goobta kooxda iyadu xaruntooda dagan ee hawl maal meed ka wada halkaasi iyaga lama siimnayo cuno maal meed shaqaalaha kale ee xarunta jooga iyo shaqaalaha goobta ee hawshoodii dhamaystay iyagu wax cunto ah malaha. Shaqaalaha dhinac maamulku marka ay safraan ee ay xarunta ka tagaan hay'adda miino saarku waxay ay siin lacag ku filan oo ay ku iibsadaan sadex goor cuntadood maalintiiba inta aysafarka ku jiraan.

i) Lamaanayaasha fulintu waxay u diyaarinayaan shaqaalaha u baxaya dibadda taandhooyin ay galaan inta ay hawsha miinada ku maqan yihiin, qalabka kale ee la siinayo kooxda waxaa aka mid noqon marakaneeco, furaash, bustayaal iyo laydh habeenkiiya waxaa ka le oo lasiin alaabta wax lagu karsado, suxuun, koobab, muqaacado iyo mindiyo.

j) Shaqaalaha maamulka waxaa la siin sahay ku filan iyo qaabka ay isu dabari lahaayeen marka ay xaruntooda ka tagaan ay u safraamn hawl ay hay'addu miinadu ay leedahay oo aan ahayn booqasho goobeed (filed visits).

k) Lamaanayaasha fulint waxay siin doonaan shaqaalahooda darku filan oo ay ku fuliyaan hawshooda.

l) Dhinacyada hawsha miinada ku jira way ilaalin donaan fasax yada wadniga ah iyo kuwa diiniga ah ee todobaadlaha ah, waxaa kale oo ay ilaalindoonaan maalmaha iyo saacadaha cibaaddada, salaada iyo soonka

m) Hadii ay miino-saarayaasha Somaliland ah uu dhaawac helis ah gaadho waxaa la qaado talaabooyin taxadir ah waxaa loogu yeedhi sidoo kalena dadka qaraabadooda ah ee ugu dhaw

n) Xarunta wax ka qabadka miinada ee Somaliland waxa ay ka caawinayaan hay'addaha fuliya hawsha miinada dhaqdhaqaaqyada dhinaca juquraafiga iyo shaqaalaynta shaqaalaha miino-saarka in ay meelkasta oo Somaliland ah ka shaqeeyaan.

## Qodobka 17aad

## Tababarka shaqaalaha

a) Lamaanayaasha fulintu waxaay culaayska saarayaan sidii ay utababari lahaayeen shaqaale wadaani ah siloga maarmo shaqaalaha caalamiga ah ay ubadalaan.

b) Hay adahaa miino saarka waxaa lagu dhiiro galinayaa inay tababaraan ama ay dib utababaraan shaqaalaha wadaniga ee miino saaridu iyadaa oo an loo eegin inay tababar hiro lahaayeen iyo inkale.

c) Heerka tababarka shaqaalaha wadaniga ahi waa in uu waafaq sanaadaa nidaamka u deg san qiyaasaha caalamiga ah ee hawsha miinada. Shaqaalaha tababarka qaata waxa la siinayaa shahaadooyin. Lamaanayaasha fulintu waxay ururinayaan rikoodhka tababarkaasi sida ay tilamaamayaan xeerka IMAS.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

d) Hadii uu sodsado xafiiska hawsha miinadu, lamaanayaasha fulintu waa in ay ka caawiyaan labadda hay'adood ee xarunta wax ka qabadka miinada ee Qaranka (SMAC) iyo hay'adDa miino saarida qaranka (NDA) tanbarka shaqaalaha wadaniga ah iyo xalinta hadba wixii soo baxa ee dhibaatooyin ee xaga farsamada ah.

e) Hay'adaha miino saaridu waxaa ay u dirayaan kaliya sifaynta miinada, shaqaalaha gaadha heerka laga rabo dhinaca tababarka, kuwaasi oo aqoontooda miino-saaridu ay dhamaystiran tahay.

f) Shaqaalah gaadhi waaya heerka laga rabo ee tababarka, hawsha miino-saarka iyaga waa la badalayaa (eryayaa), shaqaale cusubna la tababarayaa.

## Qodobka 18[aad]

## Magdhowga shilalka hawsha miinada

a) Shirikadaha caymiska ee ay heshiiska kula jiraan hay'adah miino-saarku, ayaa bixinaaya wixii ciwad-celin iyo magdhow ah ee ay xaq u yeeshaan shaqaalaha si toos ah ugu dhaawacma shaqada, waxaana lagu bixinayaa magdhowga xadiga ama qiyaasada **shareecada islaamka u astayso.**

b) Shirkada caymiska ee wadaniga ee abuurma waxaalagu dhiiri galinayaa caymınta shaqaalaha miinada ee wadaniga ah, hadii ay fuliyaan shuruudaha deeq bixiyaha dhigo.

## Qodobka 19[aad]

## Burburinta kaydka miinada iyo walxaha aan wali qarxin

a) Dawlada Somaliland, iyada oo ka duulaysa xeerka mamnuucidda miinada lidka dadka, waxa ay ka codsanaysaa lamaanayaasha fulinta iyo hay'adda miino saarka Qaranka iyo kooxda booliska ee qaabilsan hawshaas in ay burburiyaan oo ay tirtiraan miinada kaydka ah iyo walxaha aan wali qarxin.

b) Xarunta wax kaqabadka miinada ee Somaliland (SMAC), iyadoo wakiil ah xafiiska hawsha miinada Qaranka ayaa rikoodh galinaya, burburinta kaydka miinada iyo walxaha aan wali qarxin oo qoraysa qaab waafaqsan heshiiska ottowa.

c) Hay'ada miino saarka ay burburinaayaan kedka walxaha qarxa iyo hawlgalada sifaynta ah waxa ay hawlgalkooda la socodsiinayaan xarunta wax kaqabadka miinada ee Somlinad (SMAC) oo ka wakiil ah xafiisaka hawsha miinada.

d) Dawlada ayaa bixinaysa goobaha ama dhulka ku haboon burburinta kaydka miinada iyo walxaha aan wali qarxin.

# CUTUBKA 5AAD

## Qaabdhismeedka Hay'ada waxka qabadka miinada

## Qodobka 20aad

## Xafiiska Hawsha Miinada

a) Qaranka Somaliland wax uu igman hawalaha wax ka qabadka miinada xafiiska m/weyne ku-xigeenka waxaana hoosyimaada: -

- ✓ Gudidda qaranka ee miinada
- ✓ Iyo xarunta wax kaqabadka Somaliland (SMAC)



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

b) Xarunta SMAC waxa iyana hoos imanaya dhamaan hay'adaha loonayaqaan lamaanayaasha fulinta implementing partners, IPs) oo ah:

- ✓ Hay'adaha wadaniga ah ee miinada ee sida; NDA, Booliska qaybta miinada (police EOD), Ururka bisha CAS ee Somaliland, iwm.
- ✓ Hay'adaha caalamiga sida, DDG, the HALLO trust, Handicap int, iwm) iyo kuwa qaramada midoobay sida UNDP, UNPOST, UNMAS, iwm. Ee u xilsaaran waxka qabadka miinada (eeg lifaaqa kowaad)

## Qodobka 21[aad]

## Hawlaha xafiiska miinada

❖ Hawlaha xafiiska dhexe ee miinada waa koobidda guud ahaan hawlaha ay qabtaan ha'addaha wax kaqabadka miinada qaranka, waxaana kamid ah:

a) Dajinta iyo dib u eegista siyaasada hay'adaha wax ka qabashada miinada

b) Lasocodka iyo qiimaynta hawlaha, baadhista, sahaminta, soo saarida iyo burburinta miinada.

c) Isu duwida hawlaha hay'adaha waxkaqabashada miinada.

d) Fulinta axdiga mumnuucida miinada lidka dadka iyo dabagalka fulintiisa.

e) Fulinta siyaasadaha iyo qorshada wax qabadhka iyo cidhibtirka miinada.

f) Diiwaan gelinta miinada la soo saaray, la helay, la sahamiyay, la burburiyay.

g) Kormeerka iyo dabagalka hay'adaha waxka qabadka miinada.

h) Diyaarinta warbixinaha hawlaha miinada.

i) Oggolaanshaha ruqsada hay'adaha waxka qabadka iyo dabagalka kula xisaabtanka hawshooda.

j) Dhiirigalinta iyo kobcinta hay'adaha wadaniga wax kaqabadka miinada.

k) Qiimaynta kartida qalabka, farsamada, aqoonta shaqaalaha, xuquuqda shaqaalaha, badbaadada, caymiska, gurmadka caafimaadka iyo daryeelka caafimaadka ee hay'ad kasta oo ka qaybgasha hawlaha sahaminta soo saarista, baadhista, kaydinta iyo burburinta miinada.

l) Baadhista shilalka miinad iyo sababa ay ku yimaadeen isagoo adeegsanaya SMAC

m) Ka wacyi galinta dadweynaha dhibaatada iyo wax yeelada miinada

n) U ololaynta dhaqaale iyo hanta wax lagaga qabto miinada.

o) Qiimaynta warbixinaha wax ka qabadka miinada ee hay'adaha miinada

p) Xaqiijinta calaamadinta, sahanka iyo xayndaabida miinada.

q) Ilaalinta xuquuqaha iyo magdhowyada hawl wadeenada iyo dhibanayaasha miinada

r) Bixinta ruqsada iyo ogolaanshaha xaaladaha ku sheegan faqrada labaad ee qodobka 8aad ee xeerka mamnuucida miinada lidka dadka



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA • FAAFINTA RASMIGA AH • OFFICIAL GAZETTE • SOLICITOR GENERAL OFFICE

s) Diwaan gelinta iyo ka war haynta miinada loo ogolaadey qaab waafaqsan faqradda 19aad ee qodobkan

t) La socodka siinta deeq bixiyayaasha hawlaha miinada shaqada iyo hawlgalada xafiiska.

## Qodobka 22aad

## Gudida waxka qabadka miinada

a) Gudida wax kaqabadka miinada (main action committee) waxaa soo jeedinaaya isla markaana magacaabaya m/weyne ku xigeenka, isla markaana ah. Gudoomiyaha gudida. Gudidu waxay ka koobnaanayaan wasaaradaha:

- ✓ Dibudejinta ....................xubin
- ✓ Qorshaynta ....................xubin
- ✓ Caafimaadka ..................xubin
- ✓ Waxbarashada ................xubin
- ✓ Warfaafinta .....................xubin
- ✓ Gaashaan dhiga ..............xubin
- ✓ Arrimaha gudaha..............xubin
- ✓ Arrimaha dibada...............xubin
- ✓ Iyo maareeyaha SMAC ......xoghayn

b) Gudidu waxay kulmaysaa sadexdii biloodba ama kolba sida loogu baahdo.

c) Gudiga fadhigoodu wuxuu noqonayaa caasimada hargeysa.

d) Hadii gudoomiyaha gudidu (m/weyne ku-xigeenka) uu maqnaado, waxa xilka gudoomiyaha sii haynaya hadba cida uu u igmado gudoomiyuhu.

e) Dowladu waxay bixinaysaa wixii kharash ah ee ay galaan inta ay ku jiraan hawlaha gudida kharashka waxa maamuullaysa xarunta wax kaqabadka miinada

f) Maal gelinta gudidu waxay noqonaysaa miisaaniyad ay qoondeyso dawladu iyo taageerada deeq bixiyayaasha

g) Guddidu hay ad ahaan ma noqonayso tii dhex gasha hhowlo ganacsi oo macaash keen ah mana noqonayso tii dawladda hay addaha dawlada iyo saraakiishooda macaash ama saaami-hel (profits or dividends)

h) Ma noqon karo xubin kamid ah gudidu mid lagu xidhiidhiyo maareynta ama yeelasho dano maaliyadeed shirkad ama urur ganacsi oo la xidhiidhsan ama ka shaqeeya hawsha miinada ama walxaha aan wali qarxin (EOD)

### Qodobka 23aad

### Waajibaadka iyo hawlaha gudida qaranka ee miinada

- Gudida (the commission) iyada oo ah hay ada maamulka dawladda ee wax ka qabadka miinada isla markaana ah (main action authoaruty) waxa ay yeelanaysaa xilalka hoos ku xusan

  a) Ansixinta miisaaniyada hawlgalada miinada

  b) Ansixinta qorshaha miino sifaynta ee ay diyaariso xarunta waxka qabadka miinada ee Somaliland

  c) Ansixinta iyo hirgelinta qorshaha wacyigalineed eek u saabsan halista miinada ee ay diyaarisay xarunta wax kaqabadka miinada Somaliland

  d) Hubinta iyo ansixinta qorshaha ay soo diyaariso xarunta wax kaqabadka miinada eek u saabsan dhinaca farsamada iyo amaan ka miino saarida iyo iyo haw galada burburinta walxaha aan wali qarxin (EOD) qorshayaasha waxa kamida noqon kara sameynta qiyaaso heer qaran ah (national standers) samaynta nidaamka hawlgalka ee joogtada ah (SOPs) iyo qiyaasaha xubinta tayada.

  e) Ansixinta nidaamka iyo qiyaasaha tababarada ee ay soo jeediso xarunta wax ka qabadka miinada.

  f) Ansixinta qorshe-hawleed yada iyo miisaaniyadaha ay soo jeediso xarunta wax ka qabadka miinada ee Somaliland. Iyada oo la kaashanaysa gudidda deeq-bixiyayaasha (borad of doners)

  g) Ansixinta hawlgalada gudaha ee xarunta wax ka qabadka miinada ee Somaliland ee uu soo jeediyo maareeyaha xarunta.

  h) In xukuumada ay u gudbiso wax ka qabadka xarunta wax ka qabadka miinada ee Somaliland, iyo hadba hoto-umarka ay samayso hawsha miinada ee dalka oo dhan.

  i) In gudida deeq-bixiyayaasha (board of doners) si joogta ah loogu war geliyo hawlgalada iyo shaqada xarunta wax ka qabadka ee Somaliland.

### Qodobka 24aad

### Hawsha wasaaradaha

a) **Dib-udajinta:** - wasaarada dib-udajintu waxa ay hubisaa in hawlgalada miino-saaridu ay guud ahaan la miday san yihiin oo ay qayb ka yihiin dib-udhiska, dib-udajinta iyo mashaariicda did u soo celinta qoxootiga ee ay waddo dawlda somlailnd.

b) **Qorsheynta qaranka:** - hubinta in qorshaha wax ka qabadka miinadu ku xidhmo qorsha guud ee dibu dhiska, waafaqsanyaheyna dhismaha sabool nimada.

c) **Caafimaadka:** - maareynta mashaariicda daryeelka dhibanaha, qalabaynta cisbitaalada qalinkaiyo abuurista ma shaaric dib u noolayn ee dhibanaha miinada.

d) **Waxbarasha:** - wacyigalinta iyo baridda khatarta miinada.

e) **Warfaafinta:** - wacyigalinta khatarta miinada.

f) **Gaashaan dhiga:** - xirfadlaylaasha miino saarayaasha, xagta miinada, burburinta keydka miinada lidka dadka.

g) **Daakhiliga:** - sharciyada xakamaynta heysashada miinada lidka dadka, booliska.

h) **Arimaha dibadda:** - raadinta taageero dhaqaale ee hawsha miinada.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 25[aad]

**Xaarunta wax ka qabadka miinada ee Somaliland (SMAC)**

a) Xarunta wax ka qabadka miinada ee Somaliland (Somaliland mine action certre ama SMAC) waa hay'adda fulinta (executive organ) ee qaabilsan isku duba-ridka iyo habaynta guud ahaan siyaasadda qaranka iyo guddida wax ka qabadka miinada (MA commission)

b) Maareeyaha SMAC iyo shaqaalaha kale ee hay'addaba waxaa lagu soo xulayaa habka tartanka iyo nidaamka hay'adda shaqaalaha Somaliland, iyada oo la kaa shanaysa gudida wax ka qabadka miinada qaranka.

c) Xarunta wax ka qabadka miinada (SMAC) fadhigeedu wax u noqonayaa caasimada hargaysa

d) Xarunta wax ka qabadka miinadu ma noqonkarto ururu macaash raadis ah

e) Xubin ka tirsan xarunta SMAC ma noqonkarto mid lagu xuidhiidhiyo maaraynta, ama mid dano lacgeed ku leh shirkad ganacsi oo kulug leh hawlha miinada ama burburinta walxaha qarxa (EOD).

## Qodobka 26[aad]

**Qaab-dhismeedka Xarynta wax ka Qabadka Miinada Somaliland**

- ❖ Xarunta wax ka qabadka miinada ee Somaliland (SMAC) waxaa ay ka kooban tahay qaybaha hoos ku xusan: -
- ❖ Mareeyaha: - oo ah sarkaalka ugu sareeya dhinaca maamulka ee xarunta hawsha miinada ee JSL. Hawlaha uu qabanayo maareeyuhu waxaa ka mid ah:
  - ✓ Abaabulka iyo maaraynta xarunta wax ka qabadka miinada ee JSL.
  - ✓ Fulinta siyaasad ay dajiyaan ama ay soo jeediyaan xafiiska miinada qaranka iyo gudida wax ka qabadka miinada qaranka.
  - ✓ Maareeyuhu waxa u dejin xeer-hooseedyada ay ku shaqayso hay'ada wax ka qabadka miinada ee JSL.
  - ✓ Waxa uu fulin talaabooyin anshax-marinta ee shaqaalaha isaga oo raacaya xeer hoosaadyada xarunta wax ka qabadka miinada ee JSL.
- ❖ Mareeye Ku-xigeen: - oo ah madaxa waaxada hawlgalada
- ❖ Waaxda hawlgalada iyo qorshaynta: -
  - ✓ Laanta tababarada/qiyaasaha (Standers)/maareynta tayada/unuga sahanka.
  - ✓ Laanta dhaqandhaqaalaha, kaydinta macluumaadka iyo warfaafinta.
- ❖ Waaxda isuduwida: - (coordination) oo ka kooban: -
  - ✓ Laanta xidhiidhka hay'ada dawliga iyo xidhiidhka gobolada
  - ✓ Laanta isuduwidda wacyigalinta khatarta miinada iyo mashaariicda daryeelka dhibinaha miinada.
- ❖ Waaxda dhaqandhaqaalaha, kaydinta macluumaadka iyo warfaafinta



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

❖ **Waaxda taakulaynta** oo ka kooban: -

✓ Laanta maamulka lacagta iyo loojistika

✓ Laanta shaqaalaha iyo maamulka

## Qodobka 27aad

## Hawlaha xarunta wax ka qabadka miinada ee Somaliland

a) Soo jeedinta qorshe muujinaya sida ay mudnaanta ukala leeyihiin hawlaha u yaala xarunta wax ka qabadka miinada, mudnaantaasi oo laga soo xiganayo sahankii Raad-reebka miinada (LIS)

b) Hirgalinta nidaamka mareynta tayada leh.

c) Siinta taageero farsamo hawlaha sifaynta miinada iyo burburinta walxaha aan wali qarxin (EOD), iyada oo siinaysa hawlahaasi taageero dhinaca amaanka ah iyo hubinta tayadooda

d) Hubinta in heerka farsamada, amaanka iyo tayadu ay had iyo jeer ahaadaan kuwo meel sare jooga (Assurance of Standers)

e) Abuuridda iyo hirgalinta qorshe lagu sameenayo sahan guud (General survey) oo tifaftiran iyo sahan dhinaca farsamada ah (technical survey)

f) Ku shubista warbixin faahfaahsan kaydka dhexe, macluumaadka ku saabsan beeraha miinada iyo wixii kale ee macluumaad ah iyo wixii la xidhiidha ee la xidhiidha beeraha miinada ee imanaya xarunta wax ka qabadka miinada ee JSL

g) Daryeelka iyo maamulka kaydka dhexe ee macluumaadka (central database) eek u saabsan beeraha miinada iyo dhamaan wixii macluumaad ah iyo wixii la xidhiidha qalabka maabsameynt a.

h) In la siyo wirarka ku keydsan keydka dhexe ee macluumaadka cidii doonaysa ee ah ururo, maamulka iyo dadweynaha intaba.

i) Ururint iyo habaynta warbixinta ku saabsan horumarka laga gaadhay dhamaan hawl galada ku saabsan burburinta walxaha aan wali qarxin iyo hawsha miinada ee Somaliland.

j) In xeer-qiyaaseed (standers) loo sameeyo dhamaan tababarada kormeerada iyo warbixinaha qeexaya fulinta iyo hirgelinta hawlaha kor ku xusan

k) Dejinta tilmaamo dhinaca farsamada ah oo hogaamiya barashada khaterta miinada iyo waxyaabaha la xidhiidha

l) In ay eegto isla markaana ay miisaanto shahaadadaha iyo caydamaha ay wataan dhamaan ururada caalamiga ah iyo kuwa wadaniga ah eek u jira hawsha miinada si ay dabadeedna siiso aqoonsi dhinaca farsamada ah hadba sida ku haboon

m) In ay diyaariso qowshe hawleed iyo miisaaniyado ay ku shaqayso iyo warbixino iyo xisaabxidho loo gudbiyo faxiiska hawlaha miinada qaranka, gudida, iyo deeqbixiyayaasha

n) Kobcinta barnaamijka ku wajahan aqoon ku saabsan halista miinada

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 28^aad

### Hay'adda miino-saarida qaranka (NDA)

a) Hay'adda miino-saarka qaranka (NDA) waa hay'ad dawli ah oo madax banaan oo maamul ahaan hoos timaada xafiiska miinada qaranka iyo xarunta SMAC.

b) Hay'adda miino-saarka qaranka ma ogolaanayso wixii sheegasho ah ee kaga yimaada dhinaca muwaadiniinta Somaliland, ama dawlada ama ururo kale iyaga oo sheeganaya inay iska leeyihiin miinooyinka ma walxaha aan wali qarxin

c) Hay'adda miino-saarka qaranku ma ogolaanayso wixii dacwad ah ee kaga yimaada dad sheeganaya in dhibaato kasoo gaadhay dhulkooda ama guryahooda markii ay hay'addu burburinaysay miinada iyo walxaha aan wali qarxin oo ay ku hawl gashay dhul ay uqoondeeyeen xafiiska miinada qaranka iyo xarunta wax ka qabadka miinada S/L

d) Maareeyaha NDA waxaa magacaabaya madaxweyne ku-xigeenka, shaqaalaha kale ee hay'adda waxa lagu soo xulayaa habka tartanka ee ay maamusho hay'adda shaqaaluhu.

## Qodobka 29^aad

### Qaab-dhismeedka hay'adda miino-saarka qaranka

- Hay'adda miino-saarka qaranku waxay ka kooban tahay unugyada soo socda:
  - Maareeye, oo ah madax hay'adda
  - Unuga hawlgaladda, oo ay ka mid yihiin:
    - ✓ Sifaynta miinada iyo burburinta walxaha aan wali qarxin
    - ✓ Barashada khatarta miinada
    - ✓ Sahannada
- Unugga maamulka oo ay ka mid yihiin: -
    - ✓ Maaliyada iyo xisaabaadka
    - ✓ Loogistika iyo shaqaalaha

## Qodobka 30^aad

### Hawlaha iyo waajibaadka hay'adda miino-saarka qaranka (NDA)

- Hay'adda miino-saarka qaranka ayaa ka masuul ah hirgelinta hawlgaladda miino-sifaynta, hawlaha ay u xil saran tahay waxa kamid ah: -

  a) Qorshaynta iyo fulinta miinada iyo burburinta walxaha aan wali qarxin (EOD)

  b) Fulinta hawlaha mudnaan qaranka leh ee ay ansixiyeen hay'adaha xarunta wax ka qabadka miinada qaranka ee SL iyo Guddida

  c) Kobcinta iyo hirgelinta barnaamij ku dhisan miino-sifayniyo baabi'inta walxaha aan wali qarxin



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

d) Kobcinta iyo hirgelinta awood miino-sifayn ah oo buuxin karta maahida miino-sifaynta ee dalka, awood kobcintaasi oo ku dhisan tababaro waafaqsan qiyaasaha ay dejiyeen xarunta wax ka qabadka miinada ee SL iyo Gudidu.

e) Diyaarinta qorshe hawleedyo miisaaniyadi, warbixino iyo xisaab-xidholoo gudbiyo dawlada, gudida iyo golaha deeq-bixiyayaasha ah

f) Fulinta hawlgalada iyada oo la raacayo nidaamka hawlgalada joogtada ah ee qaranka (National SOP) io qiyaasaha caalamiga ah ee hawsha miinada (IMAS)

g) Keenista dhamaan qalab farsamo ee loo baahan yahay si loo qabto hawlgal amaan ah oo isugu jira miino-saarid, sahan iyo hawlaha burburinta walxaha aan wali qarxin (EOD)

h) Diyaarinta dhamaan daawoyinka jabka iyo dhaawaca ee ay ubaahan yihiin kooxaha sifaynta miinadu, sahanka iyo burburinta walxaha aan wali qarxin iyada oo la raacayo nidaamka hawlgalka joogtada ah ee qaranka.

i) Soo ururinta kaydka miinada iyo walxaha aan wali qarxin (UXO) ee yaal xeryaha militeriga.

j) Hormarinta iyo hirgalinta barashada khaterta miinada

k) Kobcinta iyo qorshaynta sahan faahfaahsan oo dhinaca farsamada ah.

l) Kobcinta, hirgalinta iyo qorshaynta sidii loo calaamadayn lahaa beeraha miinada.

## CUTUBKA 6AAD

### Qalabaynta (equipment)

### Qodobka 31[aad]

### Q/Midoobay iyo Ururada aan Dawliga Ahayn Ee Caalamiga

a) Dhamaan qalabka hawsha miinadu, ama ha noqdo mid lagu shaqeeyo ama ha noqdo mid ka xafiisyada yaala, waxa uu noqonayaa mid leh cashuur-dhaaf marka uu ka soo dagayo dekeddaha iyo madaarka Somaliland.

b) Hadii laga codsdo waa in dhamaan hay'addaha alaabada keenayaa ay bixiyaan liiska qalabku uu ku qoran yahay una gudbiyaan xarunta wax ka qabadka miinada ee Somaliland (SMAC).

c) Hay'adduhu waa inay ogaysiis hore bixiyaan qalabka ay keenayaan iyo noociisa inta loogu deeqayo hay'ada miinadda ee Somaliland iyo inta dib loo dhoofinayo sida lagula heshiiyay xarunta wax ka qabadka miinada ee Somaliland.

d) Hay'adaha miino-saarka waxay bixinayaan ama keenayaan dhamaan qalabka looga baahanyahay miino saarka amaan ah oo wax qabad leh, sahannada iyo burburinta walxaha aan wali qarxin (explosive ordinance disposal, EOD). Sidoo kale waxa ay keenayaan hay'aduhu dhamaan qalabka daawada, dhaawacyada waaweyn iyo kuwa yeryer iyo qalabka lagu kabo jabista intaba. Dhamaan qalabka la adeegsanaya waa inuu ahaada mid la socda qiyaasaha caalamiga ah.

e) Deeq-bixiyayaashuwaxa ay rabaan in lamaanayaasha fulinta la siiyo xaqa ah inay barnaamijka usoo dejiyaan qalab, kaasoo ah mid ka xor ah cashuurta iyo wixii lacag ah ee ay dekadaha iyo kastamada dalku qaadaan. Hay'adaha fulinta si ay u dhowraan qalabka tayada sare leh waxa ay xaq u yeelanayaan in ay qalabkaas kasoo iibsadaan meeshii ay rabaan, iyaga oo aan qeexin ama cadeyn sababaha ay goobtaas uga soo iibsadeen. Haseyeeshee, lamaanayaasha fulintu waxa ay ku dadaalayaan intii ay karaan in qalabka ay ubaahanyihiin ay ka iibsadaan dalka gudihiisa. Dhamaan



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH

qalabka sidaasi loo soo gato waxaa looga dan leeyahay oo kali ah fulinta barnaamijka. Deeqbixiyayaashu waxay si cad u mamnuucayaan in qalabkaasi loo adeegsado ujeedo aan ahayn ama toos ugu xidhneen hawsha miinada ee aadaminimo.

f) Lamaanayaasha fulintu waxa ay u gudbinayaan xafiiska miinada qaranka liis dhameystiran oo ku saabsan qalabka ay soo dejinayaan, kaasi oo ay ka mid yihiin warqad cadeyn ah oo ku dhejisan shay kasta oo sheekaysa cidda leh. Qalabka ay leeyihiin lamaanayaasha fulintu, ee lagu soo iibsadey lacag aan ahayn ta barnaamijka miinosaarida, qalabkaasi waxa lagaga tagi karaa dalka, marka barnaamijku dhamaado. Waxaana suurtowda in qalabkaasi dabada looga dhoofiyo Somaliland si loogu adeegsado barnaamijyo kale oo ay wado hay'adu. Qalabka dabada laga keenay ee ay leeyihiin lamaanayaasha fulintu, waxa loogu talinayaaama loo wareejinayaa sida ay ku talinayaan deeq-bixiyayaashu markii hore ku deeqay qalabkaas.

g) Hay'adduhu (IP's) marka uu barnaamijkoodu dhamaado waxa ay qalabka ku wareejinayaan xarunta waxka qabadka miinada Somaliland (SMAC), hadii aanay heshiiska deeq bixiyayaashu ka hor imanayn.

### Qodobka 32aad

### Qandaraaslayda Ganacsatada ah

a) Qandaraaslayda ganacsatada ah wixii ay qalab lasoo degaan ee lagu soo iibsadey lacagta deeq-bixiyayaasha waxa ay noqonayaan kuwo leh **cashuur dhaaf.**

b) Shaqaalaha ajanabiga ah ee ka tirsan qandaraasyada ganacsata ah lasiin mayo dhowrsoonaan diblomaasiyadeed ama tirgalin gaaar ah (special privileges) ee la siiyo hay'addaha aan dowliga ahayn.

### Qodobka 33aad

### Hay'addaha Aan Dawliga Ahayn Ee Wadaniga iyo Caalmiga

Hay'adaha aan dawliga ahayn ee wadaniga ah (LNGO) iyo hay'addaha aan dawliga ahayn ee caalmiga (INGO) ah waxaa lagu dhiirigalinayaa inay ka qayb qaataan shaqada wax kaqabadka miinada.

## CUTUBKA 7AAD

### Hababka macluumaadka

### Qodobka 34aad

### Habka maaraynta macluumaadka howsha miinada (IMSMA)

A) Sahanada saamaynta maabka sugan, ururinta macluumaadka, diiwaangelinta (documentation) iyo rikoodhsamaynta iyo waliba maareynta, intaas oo dhan waxa ay qayblagama maarmaan ah u yihiin fulinta hawsha miiinada, amaanka dadka rayidka ah ee ku nool dhulka miinaysan iyo abaabulka agab iyo maaliyada lagu hirgelinayo hawsha miinada

B) Isku duba ridka (co-ordination) habaysan ee diiwaangelinta, rikoodh sameynta maabka beeraha miinada iyo sahanada abuurista habka maareynta macluumaadka hawsha miinada oo ah qayb ka mid ah xarunta SMAC taasoo iyana xidhiidh toos ah la leh habka warbixinta juqraafiga (GIS) ee wasaarada qorsheynta ayaa mudnaanta kowaad la siiyaa



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 35aad

### Isku darsiga iyo macnaynta macluumaadka la hayo

A) Waa lagama maarmaan wada shaqaynta dhamaan dadka danaynaya hawsha miinada (stateholders) sidii ay isugu darsan lahaayeen macluumaadka (data) la hayo dabadeedna macnahana ugala soo bixi lahaayeen.

B) Macluumaadkaasi waa in la dhuuxo si loo ogaado fikrad fuudna looga qaato nooca, baaxada iyo dhulka ay ku filiqsan tahay miinada dhulka Somaliland.

C) Dhamaan maxluumaadka (infromations) sahanada heerka 1aad, heerka 2aad iyo heerka 3aad waxaa loo gudbinayaa ha'ada SMAC, muddo ah 14 casho gudahood marka la soo ururiyo ama la soo dhameystiro.

## Qodobka 36aad

### Qiyaasaha maareynta macluumaadka

❖ Hababka iyo nidaamyada loo maareeyo macluumaadka waa in la mideeyo si loo suurto galiyo sameynta kaydka macluumaaddka ee xarunta wax ka qabadka miinada ee JSL oo ay daneeyayaashu wada isticmaali karaan hawsha miinada ee aadaminimo ee Somaliland ww arrin degdeg ah waana hawl geeri iyo nolol ah sidaa awgeed waa in isla markiiba kumnuuterka la galiyo wixii macluumaad ah ee ka soo baxa hawlgalada socda wakhti kasta. Habka mideynta (standardization process) maaraynta macluumaadka waa inay ku jiraan qodobada hoos ku xusan:

a) Warbixinaha hore umarka (progress repports)/shilalka/dhacdoodinka

b) Baadhitaanada shilalka

c) Ururinta macluumadka ku saabsan meelaha la tuhun sanyahay

d) Sahannada

e) Dhamaystirka (sifaynta miinada, sifaynta goobaha dagaaladu goobaha ay ka dhaceen iyo burburinta walxaha aan wali qarxin)

f) La socodka sameynta dhaqan-dhaqaale sifaynta kadib.

g) Tababarka shaqaalaha

h) Xarunta hawsha miinada ee JSL ayaa go'aan ka gaadhi qiyaasaha (standars) la adegsanayo

❖ Abuurista xarun lagu kaydiyo macluumaadka iyo logistikada loo baahanyahay in lagu abuuro xaruntaasi oo si fiican loo qorsheeyo. Waxaana kamid noqon kara qorshahaasi qodobada hoos ku xusan:

a) Goobta (goobaha)

b) Qalabka kombuterka (hardware)

c) Qaab-dhismeedka gudaha ee ururka

d) Xidhiidhada dibada

e) Saamaynta maababka iyo soo iibinta qalabka loo baahanyahay.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

f) Qorshahani waxa uu la jaan-qaadi qorshaha maareynta kaydka macluumaadka, hawshana waxa wadi xarunta waxka qabadka miinada ee JSL.

### Qodobka 37aad

### Qorsheynta iyo ururinta macluumaadka

❖ Waxa la sameyn qorshaha qeexaya nooca macluumaadka la ururinayo sida loo ururiyo, sida loo habeenayo iyo sida loo qaybinayo. Qorshahana waxa ka mid noqon doona hawlaha hoos ku xusan:

a) Doorashada macluumaadka iyo war bixinta loo baahanyahay.

b) Abuurista bahwadaag (network) is-waydaarsata macluumaadka oo isku gaysa

c) Qeexida sida loo habaynayo macluumaadka

d) Qaybinta macluumaadka

❖ Wajiyada hore ee qorshaynta ku saabsan ururinta macluumaadka waxa lgu xidhiidhin oo uu la jaan-qaadi qiyaasaha loo dejiyo maareynta macluumaadka, qorshaynta xarunta keydka macluumaadka iyo hawsha sameynta maababka. Shaqada waxa fulin xarunta wax ka qabadka ee miinada JSL.

### Qodobka 38aad

### Nidaamyad hawlgalka Ee joogtad ah (SOP)

a) Nidaamka hawlgalka ee joogtada ah (SOP) wax uu noqon doonaa mid loo adeegsado dhamaan shaqooyinka la xidhiidha hawsha miinada iyad oo la raacayo qiyaasaha caalamiga ah ee hawsha miinada (IMAS) dhamaan hay'ada ka shaqeeya hawsha miinadu waa ay badali karaan wixii ay isku raacaan ee ka mid ah xeerarka nidaamka hawlgalka ee joogtada ah iyad oo shardi looga dhigayo in xeerarka ay bedeleyaani aanay ahayn qaar saameyn ku yeesha ammaanka.

b) Hay'adaha caalamiga ah ee miino saarida wax laga rabaa in ay ku dhaqmaan nidaamka hawlgalka joogtada ah ee qaranka, hadii kale ay la yimaadaan habka hawlgalada joogtada oo ka door roon kan hore u jiray.

### Qodobka 39aad

### Maareynta tayada leh

a) Xarunta wax kaqabadka ee Somaliland waxay u diri doontaa kooxaha ilaalinta tayada (quality control, Q C) si loo xaqiijiyo hubinta tayada (Quality Assurance, Q A) ee shaqada ay hayaan lamaanayaasha fulintu (IPS)

b) Hubinta tayada (Q C) waxaa la sameynkaraa oo kali ah inta hawshu ay ka socoto goobta oo la tago, habadeetana la eego sida ay u socoto hawsha sifaynta miinadu ama waxa kale oo hubinta tayada (Q C) la samayn karaa isla marka la sameeyo sifaynta dhulka in aan lagu wareejin bulshada dhulka la sifeeyo.

c) Hab-dhaqanka hubinta tayada la sameynayaa waa in loo sameeyo qaab waafaqsan tilmaamaha dhinaca farsamada ee habka maareynta tayada (Quality management system), nidaamka hawlgalka joogtada ee qaranka (SOP) iyo qiyaasaha caalamiga ah.

d) Warbixinta laga soo diyaarsho booqashada hubinta tayada (Q A) waa in ay u qornaato qaab warbixinaha oo hore looga heshiiyey wixii amaro ah eek u saabsan in la badalo warbixinta laguma dhaqaaqi karo inta aanay hayadaha fulinta iyo deeq-bixiyayaasha caalamigu aanay darsin go'aanada warbixinta iyo talooyinka ku sugan. Hay'adaha fulintu waxa ay xaq u leeyihiin in ay faalooyin



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH

(comments) ay ku lifaaqaan warbixinta, marka ay rabaan. Hay'adaha fulintu wax ay hirgalinayaan intii caqli gal ah talooyinka ku qoran warbixinta maareynta tayada warbixinta caynkaasi loo sameeyey ee ku saabsan hubinta tayo waa in laga dhagaa mid dadweynaha u dhex ah (public) lana siiyo dhinacyada danaynaya oodhan.

## CUTUBKA 8AAD

### Qodobo Qubane ah

### Qodobka 40aad

### Shilalka Miinada Iyo Baadhitaanka Dhacdooyinka

a) Baadhitaanka shilalka miinada ee ka dhaca hawlgalada aadaminimo ee Somaliland waxa laga waafajinayaa heerka Qiyaasaha Caalamiga iyo Nidaamka Hawlgalka Joogtada ah ee Qaranka (SOP)

b) Maareeyaha xarunta wax ka qabadka miinada ayaa magacaabaya gudida baadhista shilka.

c) Gudida baadhitaanku waxa ay ka koobnaan kartaa wakiilo ka socda xarunta wax ka qabadka miinada ee JSL, ururka ama hay'ada shilka gashay iyo cidii aqoon la bido.

d) Gudida baadhitaanka wax islamarkiiba la gayn goobta uu ka dhacay shilku, waxaana ay ku dhamayn tiri baadhitaankeeda wajiga hore 24 saacadood gudahood.

e) Marka baadhitaanka wajiga hore kadib, wax hawsha baadhitaanka iyo wixii kasoo baxaba la wareegaya w/caafimaadka iyo shaqada.

### Qodobka 41aad

### Dib-u-eegida arimaha siyaasada

a) Siyaasada ku saabsan hawsha miinad waxa dib loo eegi oo dib loo darsi laba ilaa sadexdii sanaba hal mar

b) Dib u eegidda waxaa sameynaya gudida wax ka qabadka miinada (Mine Action Commission) iyo xarunta wax kaqabadka miinada ee Somaliland (SMAC).

### Qodobka 42aad

### Dhaqangalka siyaasadda

❖ Siyaasadani waxay dhaqangalaysaa marka ay goleyaasha sharci-djintu (Wakiilada iyo Guurtida) ansixiyaan madaxweynuhuna saxeexo.

C/Risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud Ee Golaha Wakiilada

C/raxmaan Maxamed C/laahi (Ciro)
Gudomiye Golaha Wakiilada



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

**Lifaaqa 1aad**

Siyaasadda wax ka qabadka miinadda Somaliland

Lifaaqa 1aad




Xeerka Wax ka Qabadka Miinada Somaliland

33

**Lifaaqa 2aad**

**SOOYAALKA TAARIIKHEED EE MIINADA SOMALILAND**

Waxay tahay mushkilada miinadu?

Taariishda miina ee Somaliland waxay soo taxnayd muddo ka badan sodon sanadood, wajiga hore ee taariikhdaa waxay ka soo bilaabantaa dagaaladii somalida iyo itobiya ee 1964 iyo kii 1977-8. Wajiga labaad wuxuu ahaa dagaalkii dib u xoraynta dalka ee dhexmaray ciidama Siyaad Bare iyo Jebhadii SNM iyo dagaaladii sokeeye ee 1993-1995. Miinooyinka waxaa loo adeegsanaayay hab difaac si loo ilaaliyo fashiisimada ciidamada lana yareeyo soo galintaanka colka lays hayo. Waxaa lagu dhawaaqay meelo aanay miino kujirin, hase yeeshee lagu tilmaamay in ay miino ku jirto taas oo loogu talagolay in dadka lagu cabsiiyo, si aan dhulkaasi loogu adeegsan waxsoosaarka beeraha iyo daaqsinta xoolaha, Miinooyinka waxaa kaloo la dhigay meelaha wadooyinka ah, xarumaha dadwaynaha iyo khadka cagaaran ee u dhexeeya biilaha dagaalamaya. Soomaaliland waa dal ay aad usaamaysay miinada dhulku. Miinadu waxay wiiqday maciishada dadwaynaha, iyada oo baajisay beer-qodaalka, isticmaalka ilaha biyaha, dugsiyada iyo jidadka intaba. Waxa kale oo ay dib udhigtay ka soo kabashada colaadaha. Dawladdii hore ee Jamhuuriyada Dimuqraadiga soomaaliya waxa ay urursatay miino ku dhow 9.2 ilaa 2 milyan oo xabo oo loo isticmaalay daggaaladii, kuwaasi oo in tooda badan loo adeegsaday dagaaladii soomaaliland.

Kadib dagaaladii 1964-kii iyo 1977-78-kii ee somaliya iyo ethopiya. Miinada waxa lagu tax xudduudaha. Waxaana ku taxay ciidanka somalida si looga horjoogsado galitaanka ciidama ethopia. Waxa kale oo ay miinadu ku wareegsantahay fadhiisimada ciidamada iyo xeryihii qaxooti ee faraha badnaa ee laga dhisay Somaliland.

Wixii ka denbeeyay sanadkii 1981-kii markii ay hawlgaleen dagaalyahanadii {SNM} iyaga kasooduulay fadhiisimadii ay ku lahaayeen Ethopia ayaa ciidamadii siyaad bare kordhiyeen gooba miinada ay dhigayeen ee iskaga difaacayeen dagaalyahanadii SNM.

Badhtamadii sideetamadii markii uu sii xoogaystay dagaalkii {SNM} ayaa ciidankii somaliya, wax uu bilaabay inay miino dhigaan jidka ay maraan ciidamadii siyaad Bare. Bishii may 1988kii, mar dagaalkii sokeeye uu si buuxa uga dhexqarxay dagaalyahaniidii SNM iyo ciidamadii dawladii hore somaliya, taasi waxa ay keentay in dadwayniihii rayidka ahaa uu dhamaantiiba kaba magaalooyinka oo ay uqaxaan dhinaca Ethiopia, ama meelaha miyiga ee fog-fog, markii uu rayid faaruqiyay magaalooyinkii waawaynaa, waxaa kusoo hadhay ciidamadii siyad bare oo mark bilaabay barnaamij miino oo aad ubalaadhan oo ay isku difaacayeen waxa ay miinooyinkaa kus wareejiyeen xeryaha milatriga, iyo jidadka iyo wadiiqooyinka ay inta badan adeegsadaan SNM.

Intaasi waxaa dheeraa in ciidamadii siyad bare ay bilaabeen in ay dhigaan kumayaal miinada lid dadka iyo miinada lidka taangiyada, iyaga oo adeegsanaya qaab argagaxiso siloogu laayo reermiyi islamarkaana looga ilaaliyo in dadkii qaxay ay kusoo noqdaan magaalooyinka. Dagaalyahana SNM ayaa iyaguna si balaadhan u adeegsanayay miinada gaar ahaan jidadka ay maraan ciidama dawladu, marka ay jidgooyada ay samaynayaan ama ay gaadayaan koloyo ciidamo ah.

Ugu danbayntii, dagaaladii sokeeye ee magaalada Berbera sanadkii 1992kii, waxa ay keentay kooxihii is-hayay ay miineeyaan jidadka kudhow magaalada berbera sidoo kale, markii ay dagaala sokeeye ka qarxeen magaalooyinka Burco iyo Hargaisa sanadkii 1994kii, taasina, waxa ay dhalis sida la,aaminsan yahay in xoog loo miineeyo magaalada Burco.

Siyaasadda wax ka qabadka miinadda Somaliland

Lifaaqa 3aad

**Maabka Taariikhda Miinada Somaliland**
















36